


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Socdaaladii
Layaabka Lahaa
ee Bawlos



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Bawlos iyo Silas, Addoomada Ciise,
waa la xabisay. Maya, Wax khalad
ah ma aysan samaynin - waxay
jinni ka sareen qof dumar ah.
Waxay tuseen dadkii sanam
caabudayaal ah oo ku noolaa
Filibos xoogga Ilaaha runta
ah iyo Wiilkiisa Ciise.

Sabataa
aawadeed
baa loo
xabisay,
la uleeyey
oo qol lagu
xidhay.




Laga yaabee inaad
ka filayso Bawlos iyo
Silas inay cadhoodaan
oo kharaaraadaan.
Laakiin sidaa
maysan ahayn.







Sida runta ah,
saqdii dhexe ee
habeenimo ayay la
soo fadhiisteen
qaadista qasiidooyin
Ilaah amaan ah!
Maxaabiistii
kale oo idil iyo
waardiyaashii jaylka
way maqlayeen iyaga.



Durbadiiba, heesihii baa istagay. Ilaah wuxuu
u soo diray DHULGARIIR gilgila xabsigii.
Albaabadii oo idil way furmee. Silsiladihii
ku xidhnaa qof walba way ka furmeen.







HAYAAY, hayaay! Xabsi
ilaaliyihii wuxuu garanayay
in maxaabiista oo idil ay
baxsanaayaan dhibna kai
man karo. Xitaa haddii hal
maxbuus baxsado, xabsi
ilaaliyahu cigaab
dileed buu
mutaysanayaa.
Waxaa ka sii
darnayd, markii askarigii
xabis ilaaliyaha ahaa uu la
soo baxay seeftiisii si uu
isku dilo oo sheekada
meeshaa ku idlaato.



Laakiin bawlos baa ku
qayliyey isagoo leh, "Waxba
ha isyelin, maxaa wacay,
kulligayga halkaana wada
joognaa." Xabsi-hayihii
markii uu arkay waxa
dhacay, wuxuu yidhi,
"Maxaa igu waajiba ah inaan
yeelo inaan ku badbaado?"
Oo waxay ydhaahdeen,
"Rumeyso Rabbi Ciise,
waadna badbaadi
doonta, adiga iyo
dadka gurigaagaba."
Farxad badan,


Xabsihayihii wuu
rumeystay.





Subaxdii dambana waa
la daayay, Bawlos iyo
Silas waxay u dhoofeen
magaalooyin badan oo
kal duwan, dadkan u
sheegayay waxyaabaha
ku saabsan Ciise. Dadka
qar baa rumeystay,
qarna waxay isku
dayayeen inay
waxyeeleyaan iyaga.





Laakiin Ilaah baaa la
jiray adeegayaashisa.
Habeen baa waxaa
dhacay, Bawlos inuu
saacado badan
wacdinayay. Oo
wiil yar oo meesha
daaqadda ku aadan
fahdiyey baa intuu
lulmooday hurdo la
tagtay. Bal miyaad
qiyaasi kartaa kolkaa
dabadeed
wixii dhacay.



Cidwalbana way ogaatay wiilkii yaraa inuu dhintay.


Laakiin Bawlos ayaa hoos u dhaadhacay intuu laabta saray isku duubay oo yidhi,


"Ha buuqina; maxaa yeelay, naftii waa ku jirtaa." Waxay ku soo celiyeen wiilkii dhalinyarada haa isaga oo nool, oo aad bay u faraxeen.



Bawlos iyo Silas safari badan bay galeen oo waxay u socdaaleen Yurub. Mid ka mid ah safaradii ugu weynaa ee uu galo Bawlos waxa dhacday markii uu doonida saarnaa. Ma aysan ahayn sida maraakiibta casriga ah oo kale, laakiinse waxay ahayd doonyaha shiraaca, oo si fudud ay dabaylaha uga weecn karaan


khadka ay ku socoto.





Bawlos wuxuu saarnaa dooni sababtoo ah isagumr kale ayaa la xidhay. Iminka sae waa inuu hor tagaa boqrka Rooma hortiisa.







Caasimadii dunida waagaas. Dabayll aad u weyn baa joojisay socodkii doontii. Waxayna u ekeyd in hortooda ay jirto duufaan. Wuxuu ahaa safara dhib badan oo soo food saaray Bawlos iyo maxaabiistii kale ee weheshay iyo weliba naakhuudyaashii.




"Nimanyahow, waxay ila tahay
dhoofkanu lahaan doono waxyeelo
iyo khasaare badan," Bawlos baa
si ku digay. Naakhuudihii ma
dhegeysan. Oo xaggoo
badweynta bay
u sii baxeen.



Markii dabayshii weyneyd ee
duugaanta qabsaday iyaga, waxah
xargo waxtara ku wareejiyeen
doonidii iyagoo rajaynayay inay
wax u tarayso inay joojinayso.
Haddii doonida kala
jabot, biyaha ayaa
wada harqinaya
waxa oo idil.



Doonidii way liiclicday oo naakhuudihii ayaa amar ku bixiyey in la fududeeyo. Maalintii saddexaad, waxay gacmahooda ku tureen allaabtii doonida. Lagayaabee inay taasi caawiso.



Xilli habeenimo ah, ayaa malaa'ig
hor istaatay Bawlos oo u
sheegtay isaga arrimuhu inay
si wanaagsan u shaqaynayaan
oo waxwalba fiican yihiin.




Intii kalel way dhiirigelisay markii uu
Bawlos yidhi, "Nimanyahow kalsoonaada,
waayo, anigu Ilaah waan rumeysnahay
inay noqon doonto sidii la ii sheegay.
Habase yeeshee waa inaynu ka
dhacno gasiiradd."




Maalmo yar dabadeed, doonidii waxay ku burburtay
meel u dhow jasiiradda Malta. Waxaa ku dhacday
meel dhagaxyo oo laba qaybood
bay u kala jabtay. Qaarna waxay
saarnaayeen doonta, qaarna waxy
dhinicii jajabay ee doonta.




Malta, Ilaah wuxuu ku tisay
awooddiisa. Intii ay xaabada
dabka soo gurayeen, jilbis baa
qaniinay Bawlos. Dadkii waxay
isyidhaahdeen wuu dhimanayaa.
Laakiinse jilbiskii qaniinay
Bawlos waxba unma dhimin.




Deedna dadkii waxay
isyidhaahdeen Bawlos waaba
ilaah. Dad badan oo buqay baa
u yimid, oo Ilaah baa boksiiyey
iyagii ka dib markii uu Bawlos
ilaah u baryay iyaga.



Ugu dambayntii, Bawlos wuxuu yimid Rooma. Waxayna qaadatay maxkamadiisii in la dhageysto kiiskiisa laba sanadood ku dhan. Kolkii lagu jiray wakhtigaa, Bawlos wuxuu kireystay qol uu ku qaabilo dadka soo booqda isaga.




Ma garan kartaa Bawlos wuxuu kala hadli jiray dadka
soo booqda? Boqortooyada Ilaah! Rabbi Ciise Masiix!
Bawlos wuxuu ahaa addoon Ilaah oo jooga Rooma,
sida ay wada ahaayeen dhamaan dadkii kale eek u
weheliyey safarkiisa.



"Dagaal wanaagsan baan ku dagalaamay, waxaan dhameeyey tartankii, waxaan ilaaliyey rumeysadkii," Bawlos ayaa ka soo qoray sidaa Rooma. Kitaabka Quduuska inooma sheego halkii ay ku dambaysay noloshiisii, laakiin waxyaalo uu qoray boqorkii Rooma ayay ku caddahay inuu boqor nero amar ku bixiyey in

qoorta laga jaro Bawlosna sidaa ayuu ku dhintay intii uu noolaana - wuxuu ahaa addoon rumaysadka Ilaah leh, dadkana sheegana waxyaabaha ku saabsan Ciise Masiix.



Socdaaladii Layaabka Lahaa ee Bawlos

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Falimaha Rasuullada 16, 27, 28

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

